UNITED NATIONS NATIONS UNIES

Office for the Coordination of Humanitarian Affairs – Somalia

Warbixinta Xaaladda # 41 – 17 October, 2008

Is-beddellada guud ee ugu muhiimsan

Dadka rayidka ahi waxay u sii dul-qaadanayaan dhibaatooyinka ka sii daraya ee ka dhashay dagaallada weli ka sii soconaya magaalada Muqdishu. Sida ay xustay hay'adda UNHCR, ilaa dad lagu qiyaasay 5,500 qof, ayaa ka bara-kacay magaalada toddobaadka tegay, iyadoo in ka badan 61,000 qofna ay bara-kaceen ilaa 21kii September.

09 October, ugu yaraan 100 qof, ayaa lagu soo warramay in lagu la' yahay Gacanka Cadmeed, kaddib markii ay dadka tahriibka ka shaqaysta ku khasbeen inay xeebaha Yemen ku daataan. Ilaa 47 qof ayaa dhacdadaas murugada leh ka badbaaday, kuwaasoo hay'adda UNHCR ay gaysay Xerada soo dhaweynta ee Mayfa. Ilaa bishii January, in ka badan 33,000 qof, ayaa gaadhay xeebaha dalka Yemen, iyadoo ugu yaraan 230 qof la sheegay inay dhinteen, islamarkaana la la'yahay dad gaarayey ilaa 365 qof oo kale.

Dawladda Holland, ayaa xeebaha Soomaaliya u diraysa markab ciidamada badda ah, si uu ula wareego hawlgalka ilaalinta maraakiibta u raran hay'adda WFP. Wuxuu hawlgalkan cusub ee maraakiibta dalka Holland uu isna socon doonaa ilaa 10 December, iyadoo muddadaas loogu talo galay inay ilaaliyaan noocyada raashinka isku-dhafan ee lagu qiyaasay ilaa 100,000 metric tons la gaarsiinayo dalka Soomaaliya. Waana markii labaad ee sannadkan gudihiisa (April ilaa June) ay dawladda Holland maraakiibta ilaalada ah soo dirto. Waxaana xeebaha dalka Soomaaliya loo aqoonsaday meelaha ugu halista badan dunida guudkeeda. Sannadkan oo keliya, waxay burcad badeeddu af-duubtay in ka badan 30 markab.

10kii October, waxaa warfidiyeenka loogu soo bandhigay guri ku yaal magaalada Muqdishu, labadii Dhakhtar ee laga af-duubay golaha dhakhaatiirta caalamiga ah (MDM). Labada Dhakhtarba waxay awood u heleen inay warfidiyeenka la hadlaan, iyagoo af-duubayaasha ka codsaday inay iyaga sii daayaan.

16kii October, hay'a'dda Maaraynta Xogta Dhulka iyo Biyaha Soomaaliya (SWALIM), ayaa talo-bixin macquul ah soo saartay, taasoo ku wejahan halista daadadka webiga Juba ee Degmada Baardheere iyo dhul-hoosaadka Gobolka Gedo ee webigu ku faafo iyo nawaaxigiisa. Waxayna talo-bixin-tani ku soo beegantay, iyadoo warbixintu ay sheegayso in roobabkii ka da'ay dhul-koraadka dalka Ethiopia ay maalamaha soo socda sare u qaadi dooonaan heerka biyaha Webiyada Shabeelle iyo Jubba ee dalka Soomaaliya. Waxayna SWALIM, si taxadar leh ula socotaa is-beddellada xaaladaas.

Gurmadka samafalka iyo gaabiska jira

Maalinta u gaarka ah nadaafadda QM ee fara-xalashada oo ku beegnayd (15 October), ayaa waxay hay'adda UNICEF soo bandhigtay olole wacyi-gelineed oo la xiriiiray nadaafada fara-xalka, iyadoo la adeegsanayey Saabuun. Waxaana dadweynaha loo qaybiyey saabuun iyo farriimo ku qoran Afka-Soomaaliga;,ayna ka mid ahaayeen '*Caafimaadkeennu, gacmeheennuu ku jiraa'.* Waxaana munaasabaddaas ka qaybgalay carruur lagu qiyaasay ilaa 20,000 carruur ah ee dalka oo dhan. Sida ay xustay hay'adda UNICEF, cudurrada dulinka biyaha ka dhasha, ayaa lagu qiyaasay boqolkiiba 20 inay sababaan dhimashada carruurta da'doodu ka yar tahay shanta sano ee Soomaaliya, iyadoo afar-meelood meel ahaan oo keliya, dadweynaha Soomaaliyeed lagu qiyaasay inay helaan fursadaha adeegyada faya-dhawrka ee ugu habboon.

UNICEF iyo La-hawlgalayaasheeda, ayaa waxay weli sii wadaan dhaaminta biyaha nadiifka ah oo ay ka faa'iidaysanayaan ilaa in ka badan 100,000 qof oo dadka bara-kacay (IDPs), iyadoo maalintiiba loo dhaamiyo biyo ka badan 2,000,000 litres. Deegaanka nawaaxiga waddada Afgooye, ayey hay'adda UNICEF iyo la-hawlgalayaasha waxay u dhiseen Teendhooyinka iskuulada oo ka kooban 20 fasal, si fursad waxbarasho ay uga helaan ilaa 1,000 arday oo kale. Tani waxay wadarta guud ee arday ka faaiidaysanaysa ka dhigaysaa ilaa 15,000. Toddobaadkan gudihiisa ilaa 370 Macaliminta horjoogayaasha ah oo ka kala yimid gobollada Gedo, Bay iyo Bakool, kuwaasoo hay'adda UNICEF ay u qaban-qaabisay tababar la xiriira Maaraynta,Cilmi-nafsiga waxbarashada deg-degta ah. Waxaa kaloo tababarkaas ka mid ahaa mawduucyo taabanayey; nafaqaynta iyo cudurka halista ah ee HIV/AIDS-ka, waxaana la filayaa inay macallimiintu duruustaas u gudbin doonaan ilaa

70,000 carruur ah, taasoo qayb ka noqon doonta dadaalka lagu horumarinyo adeegyada tayeynta waxbarashada.

Waxay WFP u hawlgali doontaa raashin qaybin toos ah oo ay ka kala faa'iidaysan doonaan xarumaha quudinta, Xarumaha Caafimaadka Hooyada iyo dhallaanka, Barnaamijyada Taageerada Bulshada ee degmooyinka Xudur iyo Rab-Dhuure ee gobolka Bakool. Waxaa Hirgelinta Barnaamijyadan iska kaashaday hay'adaha aan dawliga aheyn (NGO), Ururka Dhaakhaatiirta Caalamiga ah ee (IMC), oo isaga hawlgalladii uu halkaas ka waday hakiyey, kaddib markii uu awaamiir ka dhan ah soo saareen Ururka Al Shabaab.
Bishii September, waxay WFP raashin gargaar ah oo gaarayey 836 metric tons u sii marisay Barnaamijyada SFP, MCH iyo SS ee gobolka Bakool, ayna ka faa'iidaysteen ilaa 36,000 qof.
Sida ay xustay warbixinta daraasaadka FSAU, waxaa xaddiga nafaqa-darrida heer caalami ee gobolaka Bakool u taagan yahay 25.5%, kaasoo ah midka ugu sarreeya dalka Soomaaliya.

Wixii Faahfaahin Dheeraad ah ee xogta Afka Ingriiska kala xidhiidh: Rita Maingi tel. 254 734 800 120 – *maingi@un.org*,
Xogta Afka Soomaaligana kala Xidhiidh: Mona Mohamed on 0733 643 737 – mohamed26@un.org
Cinwaanka Shabakadda:http://ochaonline.un.org/somalia